

Hordhaca

Kitaabkan yar waxaan ku ururiyay jawaabo waqtiya kala duwan aan ka jawaabay su'aala la i weydiiyay, waxaan is iri baahidi loo qabay weli waa ay taagan tahay, waxaana dhici karta in Alle ku anfaco addoommadiisa qaarkood, oo ay saxaan dariiqa ay ku socdaan.

Aniguna waxaan Allaah weydiisanayaa in uu iga aqbalo wixi aan soo bandhigay.

Jawaabaha ka sokow waxa aan soo gudbiyay saddex maqaal oo sheikh Albaani leeyahay, oo uu tarjumay walaalkeen Cabdirizaaq Maxamad Cilmi (ina warfaa), kheyir Allaha siiyee. sixsixid yarna waan ku sameeyay. Waxaa kale oo ku jira maqaallada ka lugu magacaabo: "xalku ma xabbad baa mise waa xaalid", oo ah bayaan ay soo saareen mashaayikh salafiyiin ah oo Makka ku kulmay xajki dhowaa kii ka horreeyay, cilmi badanina ka buuxo, oo daawo u noqon kara dhibka Soomaali heysta.

Qofki qaldama in la qabto xaq ayuu noogu leeyahay, sidoo kale in loo caddeeyo meesha qaladku ka yimid waxay ka mid tahay isu naseexaynta muslinka ka dhexeysa.

Alle wuxuu noo sheegay reer banii israa'iil waxa naxariista Alle looga fogeeyay in ay ahayd xumaanta oo aanay iska celin.

Sidoo kale haddaanay jirin dadka Alle u soo bixiyo in ay bidcoolayaalka raddiyaan diintu waa ay fasaadi lahayd, fasaadkaasina waa uu ka darnaan lahaa kan cadowga dhulkeenna dibadda uga yimaada, sababta oo ah cadowga gaalka ahi billowga hore dadka qalbiga kama weeraro, ee waa ay danbeysaa fasaadinta uu fasaadinayo diinta, bidcoolayaalkuse billowga horeba qalbiga ayay fasaadiyaan. Fiiri fataawada Ibnutaymiya (28/231-232).

Ibnutaymiya waxaa kale oo uu yiri: nimankaa in diinta laga difaaco, oo jidka Alle laga sifeeyo xadgudubkooda waa xil ummadda wada saaran oo haddii qaar ka mid ahi u istaagaan fardu kifaayuhu ka dhacaayo.

Gabagabada hordhacan waxaan u mahad celinayaa Allaah, ka dibna dhammaan walaalaha iga saaciday risaaladan in ay soo baxdo, waxaan si gaar ah ugu mahad celinayaa walaalkey Cabdilqaadir yaasiin oo laba fatwo iyaga oo cod ah u beddelay qoraal, sidoo kale walaalkey Khadar xasan axmad oo lahaa tarjamada bayaanki culimada salafiyiinta. Sidoo kale walaalkey Cabdirizaaq Maxamad Cilmi (ina warfaa), oo maqaalla muhim ah oo uu tarjamay aan ka soo qaadannay, sidoo kale walaalaha mas'uulka ka ah maktabada.com

Walaalkiin\ Cismaan Macallim Maxmuud

Medina, Saudi arabia
Khamiis, 13/2/1431 hijriga, waafaqsanna 28/1/2010.